



PATIENT EDUCATION

Astaamaha Xasaasiyadda Daran Symptoms of Anaphylaxis

Xasaasiyadda, sidoo kalana loo yaqaano xasaasiyadda shoog ah, waa falcelin xasaasiyadeed oo daran. Cunnooyinka qaarkood, daawooyinka iyo cayayaanka, sida shinnida, xoonka, iyo xuunka, waxay dadka qaarkood ku keeni karaan xasaasiyad. Caadi ahaan, dadka ka cabanaya xasaasiyadda ayaa horayba xasaasiyad ugu yeeshay cuntada, daawada ama cayayaanka.

Calaamadaha xasaasiyadda waxay u baahan yihiin daryeel caafimaad oo degdeg ah. Kuwa soo socda ayaa ah astaamo suurtagal ah:

- Dhibaato xagga neefsashada ah, sida xiiq, neefta oo ku qabata, qufac, ama sanko oo ku xidhma ama ku dareera.
- Laab xanuun ama cidhiidhi.
- Xabeeb.
- Dhibaato liqitaanka ah ama cunnaha oo cidhiidhi noqda ama cuncun cunnaha iyo afka ah.

- Dhibaatooyinka ka yimaada wareegga dhiiga. Calaamadaha waxaa ka mid noqon kara: in midabkaagu noqdo caddaan ama buluug, garaaca wadnaha oo hoos u dhaca, dawakhaad, wareerid ama miyir beelid, cadaadiska dhiigga oo hoos u dhaca, shoog, ama miyir beelid.
- Isbedelaadda maqaarka, sida xajiin, barar, finan, cuncun, ama in aad noqoto diirimaad ama casaan.
- Dhibaatooyinka caloosha, sida lallabbo, xanuun, casiraad, matag, ama shuban.
- Dareen cabsi ah oo ah in aad dareento in wax xun dhacayaan.
- Indhaha oo cuncuna, casaada ama biyeeeya.
- Madax xanuun.
- Casiraada ilma-galeenka.



Haddii aad is ku aragto mid ka mid ah astaamahan, doono daryeel caafimaad oo degdeg ah isla markiiba. Wac 9-1-1 ama qof ha kuu kaxeeyo waaxda gargaarka degdegga ee kugu dhow.

Haddii aad wax su'aalo ah ama walaac ah ka qabtid xasaasiyadda ama macluumaadkan, hubi inaad la hadasho kooxdaada daryeelka caafimaadka. Iyagu waxa ay halkan u joogaan inay ku caawiyaan.

Qoraalkan waxaa loogu talagalay kaliya waxbarashadaada iyo macluumaadkaaga. Macluumaadkan ma beddelayo talobixinta caafimaadka, ogaanshaha ama daaweynta. Daraasad caafimaad oo cusub ayaa laga yaabaa inay wax ka bedesho macluumaadkan. Haddii aad su'aalo ka qabtid xaalad caafimaad, had iyo jeer la hadal daryeel bixiyahaaga caafimaad.

MAYO CLINIC | [mayoclinic.org](https://www.mayoclinic.org)
200 First Street SW | Rochester, MN 55905